



WAR SAXAAFADDEED

TARIIKH: 11-MAY-2021

KULANKA GUDDIGA QARAN EE KA-HORTAGA LACAG DHAQIDDA & LA-DAGAALANKA MAALGELINTA ARG-GIXISADA (NAMLC)

Guddiga Qaran Ee Ka-hortaga Lacag dhaqidda & La-dagaalanka Maalgelinta Arga-gixisada NAMLC, ayaa taariikhdu markay aheyd 11-kii May 2021 ku kulmay shirkooda sedex biloodlaha ahaa Xafiiska Wasaaradda Maaliyadda.

Guddiga NAMLC wuxuu mas'uul ka yahay kormeerka hanaanka Ka-hortaga Lacag dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta Arga-gixisada AML/CFT ee Soomaaliya, halka Xarunta Warbixinada Maaliyadda (FRC) ay tahay jaangooyaha dhammeystiran ee mas'uulka ka ah xeerarka AML/CFT iyo Qiimeynta Khatarha Qaran, National Risk Assessment (NRA), kulankan waxaa shir gudoomiyey Gudoomiyaha Guddiga Qaran (NAMLC) Mudane. C/raxmaan Ducaale Bayle.

Kulanka ayaa lagu ansixiyey Concept note-ka ay Xarunta Warbixinada Maaliyadda (FRC) soo jeedisay ee dhisidda guddi hawleedka Guddiga Qaran (NAMLC Taskforce),

Sidoo kale guddi howleedka guddiga Qaran NAMLC Taskforce ayaa si aan joogta aheyn loogu kordhiyey sedex hubnood oo kala ah (Xafiiska Qeybta dhaqaalaha ee xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Xafiiska La-talinta Amniga Qaranka ee Xafiiska Madaxweynaha iyo Agaasimaha Hay'adda Diiwaangelinta & Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyeed (DADSOM).

Guddiga Qaran Ee Ka-hortaga Lacag dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta Arga-gixisada National Anti-Money Laundering Committee (NAMLC) ayaa guddi ku meelgaar ah u saaray is waafajinta labada xeer-nidaamiye isla markaana dib u eegis ku sameeya labada xeer ee is barbar socda; Xeer nidaamiyaha Hay'adaha Maaliyadeed (AML / CFT Financial institution regulation) iyo (AML / CFT Governance and compliance Regulation).

Guddiga ayaa dhamaan Wasaaradaha & Hay'adaha faray shirkaasi in ay Xarunta Warbixinadda Maaliyadda (FRC) la wadaagaan xogaha iyo macluumaadka isla markaana ogolaadaan in wareysi lala yeesho taasoo laga-maarmaan u ah dhameystirka Warbixinta Qiimeynta khataraha Qaran National Risk Assessment (NRA).

Guddiga Qaran Ee Ka-hortaga Lacag dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta Arga-gixisada National Anti-Money Laundering Committee (NAMLC), ayagoo raacaya Sharicga la-dagaallanka Lacag-dhaqidda iyo Ka-hortagga maal-galinta Argagixisada ee 2016, ayaa u kordhiyay muda xileedka Agaasimaha Xarunta Warbixinadda Maaliyadda (The Director of the Financial Reporting Center).

###